Foomka oggolaanshaha waalidka

# Tallaalista carruurta iyo dhallinyarada ka yar 16 sanno

## Ku saabsan covid-19

Covid-19 (cudurka koroonaha) wuxu inta badan keenaa infekshan ku dhaca hawo-mareennada, laakiin waxa kale oo uu keeni karaa in cudur ku dhaco unugyo kale oo jidhka ah. Dadka gaboobay iyo dadka waaweyn ee qaba cudurro soo jiitamay ayaa ugu sii nugul in ay aad ugu xanuunsadaan cudurka koroonaha.  Waa dhif iyo naadir in carruurta iyo dhallinyaradu ay aad ugu bukoodaan cudurka koroonaha.

## Ku saabsan in carruurta jirta 5-15 sano laga tallaalo koroonaha

Tallaalista carruurta jirta 5-15 sano waxay yeelan kartaa faa'ido, laakiin faa'idadu waa mid kooban maadaama carruurtu markooda horeba caadi ahaan aad ugu bukoonin cudurka. Islamarkaana waxa carruurta iyo dhallinyaradu ay difaac wacan ka heli karaan in koroonuhu ku dhaco. Tallaalka koroonuhu wuxu u wacnaan karaa: a) carruurta qabta cudurro soo jiitamay, b) carruurta u ag joogta dad cudurka u nugul, c) carruur joogaysaa waddan is-qaadsiinta cudurku ku badan tahay ama adeegyada caafimaadka aan looga heli karin sida Norway.

## Ku saabsan tallaallada

Tallaallada mRNA ah ee Comirnaty (BioTech iyo Pfizer) ayaa loo oggolaaday in lagu tallaalo carruurta iyo dhallinyarada. Waxa la oggolaaday in carruurta jirta 5 ilaa 11 sano lagu tallaalo in loogu talagalay carruurta. Laga bilaabo carruurta jirta 12 sano waxa lagu tallaalayaa tallaal le'eg inta dadka waaweyn.  Tallaalladaasi ma wataan fayrusyo nool oo qofka ma ku keenayaan infekshan koroona ah. Tallaalku si wacan ayuu qofka uga difaacayaa cudurka marka saddex toddobaad ka soo wareegto irbadda koowaad. Carruurta jirta 5-15 sano qabta cudurro kale oo waaweyn waxa lagula talinayaa inay qaataan labo irbadood oo tallaalka ah. Carruurta kale ee jirta 5-15 sano ma lagula talinayo in ay is tallaalaan, laakiin way heli karaan 1 ama 2 irbadood oo tallaalka ah haddii iyaga iyo waalidkoodu rabaan.  Koroonaha qofka hore ugu dhacay waxa uu la mid yahay hal irbad oo tallaalka ah oo waxa markaa yaraanaya tallaalka kale ee qofku u baahan yahay.  Kuwa doorta in ay is tallaalaan, waxa Machadka Caafimaadka Dadweynuhu u gartay in 1 irbad oo tallaalka ah tahay inta sida ugu wacan isugu dheelitiraysa faa'idada iyo dhibaatada tallaalka marka la eego carruurta da'aadkan jirta. Haddii irbadda 2-aad la qaato, waxa wacan in 8-12 toddobaad loo dhaxaysiiyo irabadaha tallaalka. Waayo waxa la rabaa in la yareeyo halista ku saabsan in tallaalku keeno waxyeellooyin.

Aqoon wacan ayaa loo leeyahay waxyeellooyinka ka yimaada tallaalka. Inta badan dhibaatooyinka ka yimaada tallaalka waxa ay yimaadaan 1-2 maalmo tallaalka ka dib, waana kuwo khafiif/dhexdhexaad ah oo maalmo yar ka dib qofka ka tegaya. Dadka qaar waxa ku iman kara dhibaatooyin intaas ka xoog badan. Dhibaatooyinka caadiga ah waa xanuun iyo barar laga dareemo barta irbada lagu muday, daal, madax-xanuun, muruq-xanuun, qabow dareemid, kalagoys-xanuun iyo xummad/qandho. Dadka qaar waxa ku dhaca falcelinno xasaasiyadeed (aleerjik).  Waxa la soo sheegay in khalkhal ku yimi dhiiga caddaada ee haween dhallinyaro ah ka dib markii ay qaateen tallaalka koroonaha. Arrintaas waa lala socdaa.

Caabuq ku dhaca muruqa wadnaha ama bacda wadnaha (myokarditt/ perikarditt) ayaa marar dhif iyo naadir ah iman kara marka qofka la tallaalo. Xaaladdu inta badan waxay timaadaa hal toddobaad kaddib xilliga la qaato irbadda labaad, waana wax qofku ka caafimaadayo oo dadka intiisa badan bil ka dib way ka caafimaadaan. Xaaladani waxay qofka ku keentaa laab-xanuun, neefsashada oo ku adkaata, wadne-garaac iyo xummad/qandho. Haddii qofku isku arko calaamadaha noocaas ah waa in uu u tago dhakhtar. Dhakhaatiirta Norway ayaa garatay in cudurka koroonuhu dadka qaarkood si xun u saamayn karo wadnahooda, oo ah in ka badan inta iman karta tallaalka ka dib, iyagoo islamarkaana gartay in aanay habboonayn in dhibaatadaas iman karta ay carruurta iyo dhallinyarada ka hor istaagto in la siiyo tallaalka. Way jiri karaan waxyeellooyin kale oo waaweyn oo dhif iyo naadir yimaada.

## Tallaalka ka hor

Is tallaalistu waa ikhtiyaari. Kuwa ka yar 16 sanno jir,  waa in waalidkoodu oggolaado tallaalka. Haddii labada waalid ba ku qoran yihiin masuuliyadda waalidnimo waa in labaduba oggolaadaan tallaalka. Xataa carruurta ka yar 16 sanno waxay xaq u leedahay in la siiyo warbixin iyo in aragtidooda loo tixgeliyo si ku habboon da'dooda iyo bisaylkooda. Sheeg haddii falcelin xasaasiyadeed oo darani hore ilmaha ugu dhacday, ama haddii ilmuhu tallaal kale qaatay wax ka yar hal toddobaad ka hor. Xaaladaha caafimaad ee keenaya in tallaalku habboonayn ama loo baahan yahay in baadhitaan dheeraad ah la sameeyo, waxa lagu sharraxay foomka is-caddaynta. Warbixin carruurta loo fududeeyay iyo macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan tallaalka koroonaha ee carruurta waxaad ka helaysaa fhi.no/kvp

Halkan jeex:

Magaca ilmaha : ______________ Taariikhda dhalashada : ______________

Anigu/annagu waanu rabnaa in ilmaha laga tallaalo covid-19

Isutallaab saar irbadda hadda aad oggolaanaysaan :

☐ Irbadda 1-aad
☐ Irbadda 2-aad

Waalidka leh masuuliyadda waalidnimo: Waalid 1: ______________ Waalid 2: ______________

Waalidka 1: Magaca oo buuxa (si wacan u qor): ______________

Waalidka 1: saxeex: ______________ Telefoonka: ______________

Waalidka 2: Magaca oo buuxa (si wacan u qor): ______________

Waalidka 2: saxeex: ______________ Telefoonka: ______________

Macluumaad ku socda qofka ilmaha tallaalaya: